



Maalgelin U Hel Ganacsigaaga

2022-2023

New York Immigration Coalition
nyic.org



I. HORUDHAC

Sidee Loo Adeegsada Tusmada **1**

II. SUMCADDA DEYN BIXINTA GANACSIGA

Fahamka Sumcadda Deyn Bixinta Ganacsiga **2**

Abuuritaan Sumcadda Deyn Bixinta Ganacsiga **3**

III. FURSADAHA MAALGELINTA

Maalgelinta Isla Ganacsiga **4**

Saaxiibada & Qoyska **5**

Maalgelinta Bulshada **6**

Maalgelinta Baraha Bulshada **7**

Deeq **8**

Deyn **9**

Talaabooyinka Codsiga Deynta **10**

Codsiga Deymaha ee Ganacsatada Yaryar **11**

Liiska Hubinta

IV. XIGASHO

Ururada Bulshada ee Gobolka New York **12**

Diyaarinta Hay'adaha Maaliyadda

Sidee Loo Adeegsadaa Tasmada

Waxyaabaha furaha u ah bilowga ama koritaanka ganacsiga yaryar waxaa aasaas u ah fahamka fursadaha maalgelinta ee aad heli karto si ay kaaga caawiyaan wax ka qabashada baahida ganacsiga. Ganacsiga ay leeyihiin dadka soo haajira waa 33.8% dadka iskood u shaqeysta ee deggan gobolka New York hadafkeenuna waa in la gaarsiiyo bulshada macluumaadka la xiriira iyo kheyraadka loo qoondeeyey ganacsiga ay leeyihiin dadka u soo haajiray waddanka iyo hal abuurka ganacsiga.

Tusmadan waa mid ay dadka qaxootiga ee ganacsiga leh ay ku baran doonaan sumcad deyn qaadasho u sameynta ganacsiga; dul mar guud oo ku saabsan fursadaha maalgelinta, iyo tilmaamo la xiriira codsiga deyn qaadashada. Fursadaha maalgelinta ee aad doorato ayaa sameeyn ku yeelan kara qaabka ganacsigaaga iyo mustaqbalka maaliyadda. Waa muhim in aad tixgeliso sida maalgelintu ay kaaga caawineyso in aad gaarto hadafkaaga maaliyadda iyo baahidaada dhaqaale.

Tilmaamahan kama hadlayaan shuruudaha ku xiran sida leesinka ama ogolaashaha ganacsiga. Tilmaamahan waxaa loo adeegsan karaa dulmar guud oo ku saabsan fikradaha maalgelinta ganacsiga Fadlan akhri tilmaamaha ganacsiga ee ganacsiga dadka qaxootiga ah <https://www.nyic.org/immigrant-small-business-guide/> for additional resources.

Fahamka Sumcadda Deyn Bixinta Ganacsiga

Ka hor inta aadan go'aan ka gaarin maal gelinta ganacsigaaga, waa in aad hagajisaa sumcadda deyn bixinta ee ganacsiga. **Kaararka bangiyada ee ganacsiga**, waa mid la mid ah kaararka bangiyada ee qofka, waxa ay amaah bixiyayaashu ogaanayaan in ay amaan tahay in deyn lagu amaahiyo. Waxa ay ka caawineysaa in deyn bixiyayaashu qiyaasta qiimaha ganacsiga, ama sida ganacsigu yahay mid ku haboon in deynta la siiyo. Amaah bixiyayaashu waxa ay taas ku ogaan karaan marka ay eegaan taariikhda ganacsiga iyo sida uu u bixiyo deymaha.

Kaararka bangiga ee ganacsiga waa in lagu furaa magaca ganacsiga. Taasi waxa ay cadeyneysaa in la kala saaro deynta ganacsiga iyo qofku shaqsi ahaan u qaato. Tani waa muhim waayo:

- Sumcad deyn bixinta oo la kala saaro waxa ay sumcadaada shaqsiga ah ka badbaadineysaa dhibaato ka soo guuri karta sumcad xumada ganacsiga.
- Ganacsigaaga waxa uu ka bilaabi karaa dhisidda sumcadda deyn bixinta si ay fursad ugu hesho in deyn la siiyo ama helo fursad maalgelin.
- Waxaa aad si wanaagsan u diiwaan gelisaa kharashka si canshuurta laguugu tixgeliyo.

Taariikhda Sumcadda Deyn Bixinta

Taariikhda sumcadda deyn bixinta waa mid saameyn ku yeelan karta fursadaha maalgelinta, heerka ceymiska, iyo in ay kaa caawiso in aad hesho cid kula wadaagta ganacsiga, iyo in kuwa kula shaqeeya go'aan ka gaaraan in ay kula sii shaqeyn karaan iyo in kale. Sumcadda deyn bixintu waxa ay u ogolaaneysaa kuwa kula wadaaga ganacsiga iyo deyn bixiyaasha in ganacsigu yahay mid kobcaya oo faa'iido dhalinaya.

Deyn bixiyayaashu waxa ay ganacsiga u adeegsan karaan in ay go'aan ka gaaraan in deyn lagu ogolaado iyo in kale. Sumcadda deyn bixinta ee ganacsiga iyo kan qofka labadaba waa la tixgeliyaa marka go'aan laga gaarayo shuruudaha ku xiran deynta.

Marka hay'adaha diyaariya sumcadda deyn bixinta sida Experian, Equifax, iyo Dun & Bradstreet ay qiimeynayaan sumcadaadda deyn bixinta waxa ay tixgeliyaan **qodobada** soo socda:

Inta sano ee ganacsigu soo jiray	Deynta uu ganacsigu codsaday 9kii bilood ee la soo dhaafay	Deynta uu ganacsigu qaatay 6dii bilood ee la soo dhaafay.
Inta jeer ee uu la daahay bixinta lacagta	Xajmiga ganacsiga iyo shirkadda	Taariikhda deyn bixinta ee 12kii bilood ee la soo dhaafay

Sidee Ayaa Ganacsigu Ku Heli Karaa Deyn

<p>Doorashada Qaab Dhismeedka Ganacsiga</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Qaab kasta oo ganacsi ah wuu kala saarayaa deynta ganacsiga iyo tan shaqsiga marka laga reebo ganacsi uu hal qof leeyahay • Waxa aad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaababka ganacsiga aad ka heli kartaa halkan: https://www.nyic.org/immigrant-small-business-guide/
<p>Codso lambarka canshuurta ee ganacsiga u gaarka ah (EIN)</p>	<ul style="list-style-type: none"> • EIN waxaa kale oo loogu yeeraa Lambarka Aqoonsiga Cashuurta ee Federaalka. Waa mid loogu talo galay in lagu aqoonsado ganacsiga. Ganacsigu waxa uu u baahan yahay EIN si uu canshuurta u xareeyo, u furto xisaab bangi, una codsan karo deyn, ogolaasho, iyo leesiinba. • Waxa aad EIN ku codsan kartaa adiga oo soo booqda: https://www.irs.gov/ein
<p>Xisaab bangi oo aad fursan karto.</p>	<p>Furashada xisaabta bangiga waa mid muhim ah si loo kala saaro kharashka qofka iyo kan ganacsiga. Bangiyada ayaa mararka qaarkood tixraac kuu noqon kara codsiga deynta.</p>
<p>Xiriir sumcad deyn bixin wanaagsan oo aad la yeelato hay'adaha alaabada kaa iibiya ama adeeg kuu qabta.</p>	<p>Alaabada aad ka iibsato shirkadaha waxa ay ganacsiga siineysaa fursad uu ku dhiso sumcad ganacsi.</p>


Maalgelintaada Ganacsiga

Maalgelintaada ganacsiga, ama kobcinta, waa marka aad ganacsiga ku maalgeliso hantidaada kuu gaarka ah. Ma aha wax caadi ah in dadka leh ganacsiga cusub ay heystaan lacag caddaan ah oo ay ganacsigooda ku maal geliyaan, sidaa darteed waxa ay tixgeliyaan in ay warqadahooda maaliyadda (stocks) iyo maalgelin ay horay u heystaan, deyn ay qof ahaan u qataan ama deyn ku bilaabaan ganacsiga.

Maalgelinta qof ku maal geliyo ganacsiga waxa ay u ogolaaneysaa xoriyadda uu go'aan ku gaari karo iyo in aad 100% qaadato faa'iidada iyo maalgelintaba. Waa muhim in aad xusuusnaato in maalgelinta ay mulkiilayaashu ku sameeyaan ganacsiga ay wehliso khatar iyo mas'uuliyad dheeraad ah oo ganacsiga kaga iman karta.

Marka aad adigu maalgelineyso ganacsiga waa in aad hubisaa inuu yahay mid faa'iido dhalaya sida ugu dhaqsaha badan. Waxa aad dooneysaa in ganacsiga ay kaaga soo noqoto lacagta aad ku maalgeliso.

Halkii ay u noqon lahaayeen maal geliyayaasha ama bangiyada, mulkiilayaashu waxa ay inta badan taageero weydiistaan qoysaska & saaxiibada ama in bulshada oo dhan maalgeliso.



Saaxibada & Qoysaska

Saaxibada iyo qoysaska waxa ay inta badan yihiin kuwa ay taageero u doontaan ganacsatada yaryar maadaama ay is garanaysaan oo ay ku aaaminayaan oo garanaya kartidaada.

Iyada oo ay ugu wacan tahay caqabadaha ka hor yimaada qaar ka mid ah ganacsiga marka ay deyn ama maal gelin codsadaan, taageerada dhaqaale ee ay ka helaan saaxiibada iyo qoysaska ayaa inta badan ilo dakhli u ah. Waxa ay ganacsigaaga ku taageeri karaan hadiyado, deyn ama maal gelin. Waxa kale oo ay ganacsi u fidin karaan dhaqaale aan shuruud ku xirneyn ama deyn tartiib tartiib loo bixin karo.

Inta badan runta ka sheeg khatarta iyo mas'uuliyadda wehlisa ganacsiga heshiis cadna la gal kuwa lacagta ku amaahinaya. Tixgeli talaabooyinka muhimka ah ee halkan ku xusan marka aad dooneyso in aad taageero ka hesho qoyskaaga iyo saaxiibadaa.

<p>Si gaar ah u caddee</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Caddee lacagta aad weydiisaneyso iyo waxa aad ku gaareyso
<p>Waxba haka qarir</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Waa maxay maalgelinta aad sameyneyso? • Waxa ay dadaalka aad gelineyso? • Waa maxay khatarta ka qeyb qaadashada?
<p>Heshiis kala qorta kaasoo lagu cadeynayo Qodobada Deynta</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Lacagta deynta oo ay ku jirto lacagta dulsaarka ah • Ujeedada deynta • Heshiiska dib u bixinta - hal mar in la wada bixinayo, lacag mar kasta la bixinayo • Mudada dib u bixinta iyo goorta ay bilaabaneyso iyo in si cad loo caddeeyo mudada dib u bixinta • Cawaaqibta ka dhalaneysa haddii aan la bixin lacagta

Maalgelinta Bulshada

Maalgelinta bulshada waa marka ay kharashka mashruuca ganacsiga bulshadu soo ururiyaan. Taas inta badan waxaa lagu sameeyaa barta internetka.

Waxaa jira laba nooc oo bulshadu u maalgelin karto ganacsiga yaryar.

- **Maalgelin ku saleysan tabaruc** - lacag laga soo ururiyo dadka taageersan ganacsigaaga iyada oo wax lacah ah aan loo celin doonin. Habka ay khatartiisu yar tahay, oo lacag badan la heli kawo ayaa ku wanaagsan ganacsiga yaryar.
- Dadka dhaqaalaha ku yaboohaya waxaa la siiyaa abaal marin, badeeco ama waxyaabo kale looga bedeshaa. Tusaale ahaan, haddii aad dooneyso in aad lacag u ururiso fooro aad foornadaada u gadato, waxa aad dadka abaal marin ahaan u siin kartaa qiime jaban ama keeg marka ay tabarucaad sameeyaan.

Faa'iidada iyo khasaaraha maalgelinta bulshada

Baraha bulshadu waxa ay soo bandhigaan dhawr faa'iido sida in la kordhiyo sumcadda badeecadda, abuuritaanka macaamiil iyo yareynta khatarta maaliyadeed. Waxa kale oo aad cilmi baaris ku sameyn kartaa shirkadaha la midka ah ee maalgelinta bulshada si aad u ogaato waxyaabaha dhiirigelin ee aay bixin karaan iyo sida ay ugu guuleysteen.

Hase yeeshee, in lagu guuleysto maalgelinta bulshada waa mid ku xiran awoodda aad ku gaari karto dadka deeqda bixiya.

Baraha internetka ee ay ka mid yihiin Kickstarter, Indiegogo, iyo GoFundMe waa baro aad u qiimo badan ee baraha bulshada. Waxa aad ku soo bandhigi kartaa macluumaad ku saabsan alaabada ama adeegga, aad ku tilmaami kartaa maalgelinta aad dooneyso iyo waqtiga aad ku dooneyso. Hase yeeshee, baraha internetka qaarkood ma daabacaan dhaqaalaha aad dooneyso haddii aan lagu guuleysan ama lacagaha ay ka qaadaan kaarka bangiga iyo kan amaahda.



Maalgelinta Bulshada Barta Internetka:

Barta Internetka	Faa'iidada	Khasaaraha
<p style="text-align: center;">KickStarter www.kickstarter.com</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Baraha internetka ee abaal marinta siiya dadka taageera iyo dhiirigelin loo sameeyo taageerayaasha sida qiime jabin ama alaabo la siiyo. • Baraha internetka ee ugu caansan maal gelinta bulshada 	<ul style="list-style-type: none"> • Waxa aad dhaqaalaha heli kartaa oo kaliya haddii aad gaarto hadafka • Kharashka bata internetka waa 5% • Kharashka halkii dhacdo (3%-5%)
<p style="text-align: center;">GoFundMe www.gofundme.com</p>	<ul style="list-style-type: none"> • 0% kharshka barta internetka • Waxa aad qaadan kartaa dhaqaale kasta oo lagugu yabooho haddii aad gaarto hadafkaaga iyo haddii kale • 24/7 taageerada khubarada ayaad heli kartaa 	<ul style="list-style-type: none"> • Kharashka kaararka bangiga ama amaahda
<p style="text-align: center;">Indiegogo www.indiegogo.com</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Awoodda aad ku dooran karto hadafka maal gelinta (gebi ahaan ama qeyb ahaan) ama maalgelin wax laga bedeli karo (maalgelinta lagu siiyo haddii aad gaarto hadafkaaga ama aadan gaarin hadafkaaga) • Indiegogo InDemand ayaad maalgelin dheeraad ah ku codsan kartaa mrka aad gaarto ololahaaga 	<ul style="list-style-type: none"> • Kharashka bartan internetka waa 5% • Kharashka qolo sadexaad oo lacagta soo ururisaa

Deeqda

Deeqdu waa mid ka mid ah hababka ganacsiga loogu helo maalgelin marka uu gaarayo ujeedooyin gaar ah. Maalgelintu waxa ay ka iman kartaa hay'adaha dawladda sida wakaaladaha, bangiyada/ururada deymaha, ama kuwa aan faa'iido doonka aheyn.

Marka aad codsaneyso deyn waxa ay deyn bixiyayaashu kaa doonayaan in aad tusto awoodda aad u leedahay in aad dib u bixin karto, laakiin hay'adaha deeqda bixiya waxa ay doonayaan in aad tusto in maalgelintu waafaqsan tahay ujeedooyinka ganacsiga iyo kuwa gaarka ah ee loo codsanayo. Si ka duwan deymaha, deeqda ma aha mid la doonayo in aad dib u bixiso oo inta badan saameyn kuma yeelato go'aamada ganacsiga.

Faa'iidada kale ee deeqda waa iyada oo aan lagaa dooneyn sumcad deyn bixin. Hase yeeshee, deeqda waxaa inta badan ku xiran shuruudo aad u adag oo ay adag tahay in si fudud looga soo baxo, saameyn xagga canshuuraha ah, iyo shuruudo la xiriira sida loo isticmaali karo. Inta ugu badan ee la siinayo waa mid ku xiran sida ganacsigu u waafaqsan yahay ujeedada ama hal abuurka, codsiga deeqda waa mid aad loogu tartamo in yarna ay ku guuleystaan.



Deymaha

Marka aadan adigu maalgelin karin ganacsiga, inta badan **deynta** ayaa ah fursadaha kuu furan. Deynta ganacsiga ayaa kaa caawin karta in aad lacag caddaan ah hesho, aad ku iibsato qalab, oo laga caawiyo in ganacsigaagu karo.

Si ka duwan deynta caadiga ah ee ganacsiga loo qaado, deynta ganacsiga yaryar waa mid dulsaarkiisu yar yahay, la bedbedeli karo mudada bixinta iyo fududeynta codsiga deynta.

Waxyaabaha lagaa doonayo in aad tixgeliso marka aad deyn codsaneyso:

- Isticmaalka lacagta
 - Deyn bixiyayaashu waxa ay doonayaan in ay arkaan qorshe cad oo deynta ku saabsan, iyo in la cadeeyo sababta deyn loogu baahan yahay
- Inta la bixinayo
 - Ma awoodi kartaa inta aad bixineyso bil kasta ee deynta aad qaadaneyso?
 - Ma awoodi kartaa bixinta dulsaarka deynta kaliya?
 - Bixinta deynta dib ma u dhigi kartaa haddii loo baahdo?
- Kharashka
 - Ma awoodi kartaa bixinta kharashka dulsaarka?
 - Ma kharash ayaa lagaa doonayo haddii aad deynta bixiso xilli hore?
- Waqtiga
 - Waqtiga ugu wanaagsan ee deynta la codsado waa marka aad dhaqaalaha u baahneyn. Muddo ayey qaadataa in deynta la ogolaado, waa muhim in aad sii ogaato baahidaada xilli hore.



Talaabooyinka Codsiga Deynta

<p>La tasho deyn bixiyaha</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Ugu horeyn, ka bilow bangiyada degaanka ama kuwa deymaha bixiya oo xiriirka aad la leedahay. Haddii aadan bangiyada la xiriir karin, waxaa jira deymo ay magaalada iyo gobolka ama hay'adaha Horumarinta Maalinta ee Bulshada ayaa ah meelo kale oo aad deyn ka codsan karto.
<p>Go'aan ka Gaarista Tirada (Cadadda) Deynta</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Go'aan ka gaarista inta ay le'eg tahay lacagta aad u baahan si aad u bixiso kharashka • Waa in aad go'aan ka gaartaa in kharashkani yahay mid mar kaliya ah ama soo noqnoqda
<p>Tixgeli waxyaabaha ay deyn bixiyayaashu doonayaan</p>	<ul style="list-style-type: none"> • In aad fahamto cadeymaha ay kaa doonayaan ee aad soo raacineyso codsigaaga
<p>Caddee ujeedadda (Sida aad u isticmaali doonto deynta)</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Tusaale: <ul style="list-style-type: none"> ◦ In aad ku iibsato qalab cusub ama alaabada aad ku gadato ◦ In aad ku iibsato ama ku ijaarato dhisme/dukaan ◦ In aad bixiso mushaharka shaqaalaha
<p>Dib u xisaabi sida deynta lagu bixinayo</p>	<ul style="list-style-type: none"> • Waa in aad hubisaa in aad awoodi karto lacagta bil kasta lagaa doonayo ka hor inta aadan ogolaan deynta • In aad ogaato sida deynta dib loogu bixinayo iyo in ay noqoneyo mid mudada dheer ama mudada gaaban ah. • In aad xaqiijiso haddii aad wax ka bedeli karto inta aad bixineyso bil kasta ama haddii ay isku mid tahay bil kasta.

Liiska Hubinta Codsiga Deymaha Ee Ganacsatada Yaryar

Marka aad diyaar u tahay in aad soo gudbsio codsiga deynta waxaa lagaa doonayaa in aad diyaariso warqadaha Maaliyadda iyo Ganacsiga si aad u codsato deynta.

Qoraaladda Maaliyadda

Waxa aad u baahan tahay kuwii ugu dambeeyey

- Canshuur celinta ganacsiga iyo tan qof ahaaneed
- Warbixinta maaliyadda waxaa ka mid ah
 - Warbixinta Faa'iidada iyo Khasaaraha, Xisaab xirka, iyo warbixinta Lacagta Caddaanka ah
- Warbixinta qof ahaaneed waxaa ka mid ah
 - Lambarka Bulshada ama lambarka ITIN, dakhliga, sumcadda deyn bixinta, tariikhda iibasashada, iyo macluumaadda xisaabaadka bankiga iyo deyn bixinta

Aqoonsiga Ganacsiga

- Qaabka ganacsiga iyo aqoonsiyada sharciga ah
 - Qodobada lagu aasaasay ganacsiga
 - Diiwaangelinta ganacsiga iyo leesinka
 - Sharciyada lagu aasaasay iyo nidaamka ay ku shaqeeyaan
 - Nuqul ka mid ah heshiiska kirada haddii ganacsigu goob kiro ah degan yahay
- Qorshaha ganacsiga
 - Tani waxa ay kuu tahay fursad aad deyn bixiyayaasha ugu soo bandhigto qiimaha ganacsiga. Taas waxaa ka mid waxyaabaha aad dhinaca maaliyadda ka fileyso, hadafka ganacsiga iyo istaraatiijiyadda.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qoraalada maaliyadda iyo ganacsiga ee looga baahan yahay codsiga deynta soo booqo:

<https://www.sba.gov/funding-programs/loans/7a-loans>

Hay'adaha Horumarinta Maaliyadda ee NYS

Hay'adaha Horumarinta Maaliyadda waxa ay u fidiyaan dadka qaxootiga ah, ganacsiga ay leeyihiin dumarka, bulshada dakhligoodu yar yahay deyn uu dulsarkoodu yar yahay, fursadaha deeq dhaqaale, iyo adeegga maaliyadda sida tababar fool ka fool ah iyo barnaamijyo tababar.

CDFI waa meelo dadku ka heli karaan xog qiime badan oo ka caawin kara fursad ay ka heli karaan aqoonta ay ku codsadaan karaan maalgelinta iyo koritaanka ganacsiga yaryar. Halkan hoose waxaa ku xusan hay'adaha CDFI ee xaruntoodu tahay NYS oo aad taageero uga heli karto ganacsigaaga:

Accompany Capital Accompanycapital.org	BOC Capital Boccapital.org
Renaissance Economic Development Corporation renaissance-ny.org	Pursuit https://pursuitlending.com/
TruFund Financial Services https://www.trufund.org/	Liis kale oo dheraad ah hay'adaha CDFI oo xaruntoodu tahay New York waxa aad ka heli kartaa adiga oo soo booqda https://www.nyscdfi.org/nyscdfis